# Waa sidee ka muslim ahaan in lagu noolaado Göteborg?

Sahmintan waxay ku wajahan tahay adigaa isku aqoonsan muslim, deggan degmada Göteborg kana weyn 16 jir.

**Maxay sahminta ku saabsan tahay, waana maxay sababta aan u doonayno inaad ka qeybqaadato?**

Magaalada Göteborg (degmada) waxay doonaysaa in ay hesho aqoon dheeri ah oo ku saabsan sida ay tahay in Göteborg lagu noolaada ka muslim ahaan. Aqoontaas waxaa loo adeegsan doonaa shaqada degmada ee sinnaanta iyo qeyb ka ahaanshaha.

Magaalada Göteborg waxay sidaa darteed FoU i Väst (HiD ee Galbeedka), waaxda **h**orumarka **i**yo **d**araasadda ee gobolka Göteborg u dirtay howl ah in ay sameeyaan sahmin. Sahmintan waxaa ku jira su’aalo ku saabsan khibraddaada deggenaanshaha iyo ku noolaashaha Göteborg adigoo muslim ah iyo la kulanka howlaha degmada.

Daraasadda waxaa ansixiyay Hey’adda hubinta anshaxa [lambarka galka 2025-02782-01].

**Sidee ayaa looga jawaabayaa?**

Sahminta waxay ka kooban tahay 26-53 su’aalood (waxay ku xiran tahay sidaad uga jawaabto), waxayna qaadanaysaa qiyaastii 5-20 daqiiqadood in laga jawaabo.

Waa ikhtiyaari in laga jawaabo su’aalaha sahminta ah oo markaad doontidna waad joojin kartaa ka qeybqaadashadaada. Balse jawaabaha aad hore u soo dirtay way keydsamayaan.

**Maxaa ku dhacaya jawaabahaaga?**
Ma ururinayno macluumaad oo shakhiyan laguugu aqoonsan karo. Sidaa darteed ka qeybqaadashadaada waa mid gebi ahaanba qarsoon. Ka fiirso magac ama macluumaadka lagaala soo xiriiro in aadan qorin. Maadaama aynaan ogayn qofka soo jawaabay kuma tusi karno ama ma masixi karno jawaabahaaga gaarka ah.

Jawaabaha waxaa loo maaraynayaa si dadka aan fasaxa u haysan aysan u heli karin. FoU i Väst (HiD ee Galbeedka) waxay isku dubbaridaysaa jawaabaha heer kooxeed, taasoo micnaheedu tahay in shakhsi gaar ah jawaabtiisa aan la aqoonsan karin. Natiijada sahminta waxaa loo adeegsan doonaa si loo qoro warbixin magaalada Göteborg loo dirayo, taasoo xitaa lagu soo daabici doono goteborgsregionen.se guga 2026.

**Masuulka daraasadda**
Daraasadda waxaa masuul ka ah FoU i Väst (HiD ee Galbeedka). Waxaad cilmibaaraha masuulka ah ka helaysaa levaigbg@goteborgsregionen.se. Howlbixiyaha waa Göteborgs stad. Waxaad masuuliyiinta howlwadeennada ah kala xiriirtaa levande.historia@stadshuset.goteborg.se.

Waxaad macluumaadkan ku kaydsan kartaa adigoo sawir ka qaadaya shaashaddaada ama dejiso macluumaadka marka aad dhamaysid sahminta